HELLENIC REPUBLIC
Ministry of Migration & Asylum

UNHCR
The UN Refugee Agency



# Macluumaad Hagitaan oo loogu talagalay ka faa'iideystayaasha Ilaalinta Caalamiga ah

La cusbooneysiiyay Disembar 2023

# Shaxda Tusmada

**CUTUBKA 1**

**Ku saabsan hagahan........................................................................ 5**

**CUTUBKA 2**

**Macluumaad ku saabsan Giriigga ........................................... 8**

Goobta Juquraafiyeed........................................................................ 10

Nidaam siyaasadeed........................................................................ 10

Dadka 11

Luuqada........................................................................ 11

Diinta 11

Lacagta rasmiga ah ........................................................................ 12

Fasaxyada Rasmiga ah iyo Kuwa Dadwaynaha........................................ 12

Gaadiidka dadweynaha/safarka ........................................................ 13

Saacadaha dukaamadu shaqeeyaan ................................................ 13

**CUTUBKA 3**

**Tallaabooyin degdeg ah ka dib marka lagu siiyo xaaladda Ilaalinta Caalamiga ah ............................................................ 14**

Sharciga degenaanshaha........................................................................ 16

Dukumentiyada safarka........................................................................ 16

Xuquuqda aasaasiga ah ........................................................................ 17

Sida loo helo Lambarka Amniga Bulshada ee Giriigga (AMKA).................. 18

Sida loo helo Lambarka Aqoonsiga Canshuurta ee Giriigga (AΦM).......... 18

Cashuur celi........................................................................ 19

Sida loo furto Xisaab Bangi........................................................................ 19

CUTUBKA 4

Shaqada iyo Shaqaaleynta ........ 21

Shuruudaha shaqada ........ 23

Iska diiwaangelinta diiwaanka dadka caynsan ........ 23

Sida shaqo loo raadsado ........ 24

CV iyo Warqadda Shaqa Dalbashada ........ 24

Wareysiga shaqada ........ 25

Adeeg Shaqaaleysiinta ee Dadwaynaha (Δ.ΥΠ.Α.), Horey loo oran jiraya Xafiiska Shaqada Shaqaalaha (Ο.Α.Ε.Δ.) ........ 25

Internetka ........ 26

Xuquuqaha iyo waajibaadka Shaqaalaha ........ 26

Lacagaha shaqo la'aanta iyo dadka dakhligoodu hooseeyo ........ 27

CUTUBKA 5

Hoyaadka ........ 28

Barnaamijyo/qorsheyaal hoyaad oo loogu talagalay ka faa'iideysatayaasha Ilaalinta Caalamiga ah ........ 30

Macluumaad Ku Saabsan Guryaha Kirada Ah ........ 31

CUTUBKA 6

Waxbarashada ........ 33

Nidaamka waxbarashada Giriigga ........ 35

*I. Waxbarashada caruurnimada hore iyo barbaarinta ........ 36*

*II. Waxbarashada Dugsiga Hoose iyo Qaybta Hoose ee Dugsiga Sare ........ 36*

*III. Waxbarashada Dugsiga Sare ee Aan Khasabka Ahayn ........ 37*

*IV. Fursado Waxbarasho Oo Gaar Ah Oo Loogu Talagalay Dadka Qaxootiga Ah ........ 38*

*V. Waxbarashada Dadka Waaweyn ........ 38*

*VI. Helitaanka Tacliinta Sare ee Jaamacadda ........ 39*

## CUTUBKA 7

## Daryeelka caafimaadka ............ 40

Macluumaad guud ............ 42

Rugaha caafimaadka ee degmada ............ 42

Xarumaha caafimaadka ee ay maamulaan Hay'adaha Aan Dawliga Ahayn ............ 42

Daryeelka Farmeshiga ............ 43

Adeegyada caafimaadka dhimirka ............ 43

Tallaalka Guud ............ 44

## CUTUBKA 8

## Macluumaad Waxtar leh iyo adeegyada la heli karo ............ 45

Xarumaha Dal-laqabsiga Soo-galootiga (K.E.M.) ............ 47

Golayaasha Dal-laqabsiga Qaxootiga iyo Soo-galootiga (Σ.Ε.Μ.Π.) ............ 47

Hay'adaha Metelaadda Wadajirka ah ee Muwaadiniinta Waddan Saddexaad ............ 48

Miiska Kaalmada Isdhexgalka Bulshada ............ 49

AdeegyadaDegdegga ah ............ 49

# CUTUBKA 1
# Ku saabsan hagahan





Hagahan waxaa lagula hadlayaa dadka qaangaarka ah kuwaas, oo markii ay codsadeen, ay hay'adaha Giriigga ee ku habboon siiyeen ilaalin caalami ah, kaas oo ah heer qaxootinimo sida ku xusan Heshiiskii Geneva 1951 ama ilaalin hoosaad kale.

Sida ay qabto Istaraatijiyadda Isdhexgalka ee dowladda Giriigfu, isdhexgalku waa nidaam dhina-cyo badan oo muddo dheer socda kaas oo ka kooban isku dayista la qabsashada waddan cusub iyo xaqiiq dhabaale cusub. Hagahan waxa loo sameeyay inuu noqdo agab wax ka tara bilowga hawshan, kaas oo bixinaya macluumaad aasaasi ah oo loogu talagalay dadka Giriigga jooga ee la siiyay qaxoontinimo ama ilaalin kale, ee isku dayaya inay bilbaan nolol cusub iyo inay ka faa'iideystaan fursadaha iyo kanshooyinka waddankani baxsho.

Hagahan waxaad ka heli doontaa macluumaad ku saabsan **nolosha Giriigga, Tillaabooyinka ugu horeeya ka dib markii lagu siiyo Ilaalin Caalami ah, Shaqada/ Shaqaaleysiinta, Guriyeynta, Waxbarashada iyo Daryeelka Caafimaadka.** Macluumaadkan waxa kaaba adeegyada kale ee la heli karo, NGO-yada iyo hay'daha kale.



# CUTUBKA 2
# Macluumaad ku saabsan Giriigga




ROMANIA
Bucuresti
Sofia
BULGARIA
N.MACED.
Bari
Tirane
Thessaloniki
Athens
GREECE
Valetta
Sea
Banghazi

## Goobta Juquraafiyeed

Giriigga (magaca rasmiga ah ee dastuuriga ah: Jamhuuriyadda Giriigga) waxay ku taalaa caaradda koonfur-bari ee Yurub, jasiiradda Balkan, bartaas oo Yurub ay kula kulanto Aasiya iyo Afrika. Waxyaabaha aasaasiga ah ee waddankan waxa ka mid ah inuu leeyahay 6,000 oo jasiiradood iyo inuu leeyahay xeeb dhererkeedu yahay 15,000 oo kilomitir, taas oo xeebta 9aad ee adduunka ugu dheer.

## Nidaam siyaasadeed

Nidaamka siyaasadeed ee dalka Giriigga waa Jamhuuriyadda Baarlamaanka oo hal meel laga maamulo. Madaxa hogaanka dowladdu waa Madaxweynaha Jamhuuriyadda. Sharciga Aasaasiga ah ee dalku waa Dastuurka Giriigga kaas oo sameynta sharcigadda waddanku ku saleysan tahay, sida xuquuqaha iyo waajibaadka muwaadiniinta, hab-dhiska iyo shuruucda aasaasiga ah ee dawladda Giriigga iyo Hay'adaheeda.

Awoodda sharci dejinta waxaa leh baarlamaanka, oo ka kooban saddex boqol (300) xubnood oo lagu soo doorto codbixin guud muddo afar (4) sano ah, iyo Madaxweynaha Jamhuuriyadda. Awoodda fulinta waxaa leh madaxweynaha Jamhuuriyadda iyo Xukuumadda oo uu madax ka yahay Ra'iisal Wasaaruhu. Macluumaadka qaab-dhismeedka Xukuumadda, Ra'iisul Wasaaraha iyo Wasiiradda waxaa luuqado kala duwan lagaga heli karaa government.gov.gr, halkaas oo sidoo kalena aalad turjumaaneedna lagu baxsho. Nidaamka garsoorku waa ka madaxbannaan yahay fulinta iyo sharci-dejinta waxana ka masuul ah maxkamadaha (kuwa maamulka, rayidka iyo dembiyada).

Dhammaan dadka ku nool gudaha dhulka Giriigga waa inay helaan difaac buuxa oo dhanka noloshooda, sharaftooda iyo xorriyadooda ah iyada oo aan loo eegeyb jinsiyaddooda, qowmiyadooda ama luqadooda iyo diinta iyo fikirka siyaasadeed ee ay aaminsan yihiin. Waxa jira xaalado khaas ah oo reeban oo la ogol yahay si waafaqsan shuruucda caalamiga ah.

## Dadka

Dadka Giriiggu xilliga tirakoobka la sameeyay ee sanadkii 2011-ka[1] waxay ahaayeen 10.8 milyan oo qof oo deegaan ah, kuwaas oo 912,000 ka mid ah ay ahaayeen ajaanib badidoodu ka yimid waddamada Albaaniya, Roomaaniya, Bulgaaeiga, Bakistaan iyo Joorjiya. Marka la eego qiimaynta rasmiga ah ee Eurostat, dadka ku nool dalka 1dii Janaayo 2020 waxaa lagu qiyaasay inay ahaayeen 10,691,204.

Caasimada wadanka waa Athens, oo ku taalla gobolka Attica. Marka la eego qaybaha maamul ee hadda, waxa waddanka ka jira 7 maamul oo daadegsan, 13 gobol iyo 325 Degmo. Gobolada oo ay ku jiraan Degmooyinku ayaa isku noqda maamul deegaan. Arrimaha deegaanka waxaa u xilsaaran maamulka deegaanka . Sida caadiga ah degmadu waxay masuul ka tahay arimaha deegaanka ee hoose halka gobolku masuul ka yahay arimaha deegaanka guud. 10ka degmo ee ugu waaweyn dalka (marka lagu saleeyo xogta sanadkii 2011) waa Athens, Thesaloniki, Patras, Heraklion, Piraeus, Larissa, Volos, Peristeri, Rhodes iyo Ioannina.

## Luuqada

Luuqadda rasmiga ah ee dowladda Giriigga waa Giriig, taas oo laga isticmaalo dhammaan dhulka iyo dhammaan heerarka waxbarashada.

## Diinta

Sida uu qabo dastuurka dalka Giriigga, diinta dalkaas ka jirtaa waa Kaniisadda Ortodokiska Bari ee Masiixiga, taas oo ay haystaan dadka deegaanka badankiisu.

Dastuurku wuxuu qeexayaa xuquuqda xorriyadda diinta iyo caabudidda diin kasta oo la yaqaan, inta aanay taasi wax dhib ah u geysanayn siyaasadda dadwaynaha iyo dhaqamada sharci ee la ogol yahay. Dalka Giriigga, helitaanka xuquuqda rayidka iyo siyaasadeed kuma xirna diinta uu qofku aaminsan yahay.

1. https://www.statistics.gr/2011-census-pop-hous. Sannadkii 2021, tirakoob cusub oo dadweynaha iyo guryaha ah ayaa waxaa fuliyay Hay'adda Tirakoobka ee Giriiga (ELSTAT). Natiijooyinka tirakoobka waxaad ka arki kartaa xiriirka soo socda https://elstat-out-sourcers.statistics.gr/Census2022_GR.pdf).

## Lacagta rasmiga ah

Lacagta wadanku waa yuuro (€). Macaamilada maaliyadeed waxa lagu sameyn karaan lacag caddaan ah, kaarka lacagta lagu shubto, ama kaararka deynta.

## Fasaxyada Rasmiga ah iyo Kuwa Dadwaynaha

Maalmo cayiman oo sanadka ka mid ah ayaa loo qoondeeyey in ay yihiin fasaxyo. Qaarkood waa qaanuuni (qasab sharci ahaan), qaarna waa iska caado. Maalmo maalmaha loo qoondeeyay inay yihiin fasax dadweyne, adeegyada dowladda iyo/ama ganacsiyada gaarka loo leeyahay waa xiran yihiin. Xafladaha sharcigu waa kuwan:

| Magaca Fasaxa Dadwaynaha | Taariikhda |
|---|---|
| Maalinta Sanadka Cusub | 1-da Janaayo |
| Ciidda Ibifani | 6-da Jannaayo |
| Fasaxa qaranka ee 28-ka Oktoobar | 28-ka Oktoobar |
| Fasaxa qaranka ee 25-ka Maarso | 25-ka Maarso |
| Maalinta Shaqaalaha | 1-da May |
| Isniinta listar | Fasax isbedbedela |
| Maalinta Dhimashada Maryam | 15-ka Agoosto |
| Dhalashada Nebi Ciise; Kirismas | 25-ka Diiseembar |
| Maalinta Feedhka | 26-ka Diseembar |

Intaas waxaa dheer, Axad kasta, adeegyada dawladda iyo inta badan ganacsiyada gaarka loo leeyahay iyo dukaamada waa xiran yihiin. Ugu dambayntii, waxaa jira fasaxyo ku saleysan qaybaha bulshada (Ciidamada Qalabka Sida, Dugsiyada) iyo weliba fasaxyada u khaaska goobo gaar ah (maxalli), taas oo aan khuseyn dadwaynaha guud.

## Gaadiidka dadweynaha/safarka

Gaadiidka dadwaynuhu wuxu sahlaa in magaalooyinka iyo magaalada dhexdeeda loogu kala safro. Dhul-weynaha waxaa ku yaala basaska magaalooyinka (KTEL), wadada tareenada xaafada ah iyo weliba shebekad tareen. Waxaa jira wado dhulka hoos marta (METRO) oo ka shaqeysa Athens iyo guud ahaan gobolka Attica. Jasiiradaha waxaa isku xira oo u adeega khadad doomo ah. Dekedaha Attica (Piraeus, Rafina, Lavrio) waxay ku xiran yihiin ku dhowaad dhammaan jasiiradaha Giriigga. Meelo badan oo ka mid ah dhulka Giriigga, oo jasiiradaha iyo dhulweynaha labadaba ah ayaa waxa isku xira duulimaadyo. Waxaa jira 39 garoon diyaaradeed oouWaxaa jira 39 garoon diyaaradeed oo u adeega shacabka isticmaalaya gaadiidka cirka.

## Saacadaha dukaamadu shaqeeyaan

Waxa jira saacado horey loo go'aamiyey inay dukaamadu shaqeeyaan, taas oo ku xidhan halkay ku yaalliin iyo ujeedadooda. Dukaamada gaarka ah, sida farmashiyeyaasha waxay furan yihiin saacado gaar ah oo ay shaqeeyaan iyo jadwallo heegan si dadweynuhu ay adeegooda u helaan 24ka saacadoodba.



# CUTUBKA 3
# Tallaabooyin degdeg ah ka dib marka lagu siiyo xaaladda Ilaalinta Caalamiga ah





## Sharciga degenaanshaha

Haddii ay Dawladda Giriiggu ku siisay xaalad qaxootinimo, waxaad heli kartaa sharci deganaansho shaqeynaya muudo saddex (3) sannadood ah, kaas oo dib loo cusbooneysiiyo ka dib marka dib u eegista ku habboon la sameeyo. Sharciga degenaanshaha ee dadka helay ilaalin hoosaadka waxa la baxshaa hal (1) sannad waxana dib loo cusbooneysiinayaa laba (2) sannadood ka dib marka dib u eegis lagu sameeyo.

Si aad u hesho ruqsada deganaansha ee daabacan, waa in aad codsi u gudbisataa Xafiiska Maamulka Booliska/Baasaboorka ee awoodda u leh ee uu kuu soo tilmaamay Xafiiska Magangalyada Gobolka ee aad codsigaaga ilaalinta caalamiga ah ka soo gudbisey. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habka bixinta iyo helitaanka sharcigaaga degenaanshaha waxaad ka heleysaa halkan.

Si aad u cusboonaysiisid sharcigaaga degenaanshaha, waxaad codsi iimayl ahaan ugu soo diri karta cinwaanka iimaylkan: GAS.residencepermits@migration.gov.gr, soddon (30) maalmood oo kalandaareed k hor dhicitaankiisa.

Haddii aad joojiso qaxootinimadaada ama ka faa'iideysiga ilaalinta caalamiga ah, sharcigaaga degenaanshaha dib looma cusbooneysiin karo.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan nidaamka dib u cusboonaysiinta sharcigaaga degenaanshaha waxaad ka heleysaa halkan.

## Dukumentiyada safarka

Haddii aad heshay xaalad qaxootinimo, oo aad weliba dooneysid, waxaad heli kartaa dukumeentiga safarka ee Jamhuuriyadda Giriigga kaas oo kuu sahlaya inaad booqato waddamada Midowga Yurub muddo sagaashan (90) beri ah. Haddii aad heshay ilaalin hoosaad, Maamulka Giriiggu waxay ku siin doonaan dukumeenti safar, markaad codsato, keliya haddii aad awoodi waydo inaad dukumeenti safar ka hesho maamulka dalkaaga. Xusuusnow, in dukumentigaaga safarka uu yahay shaqsi ah oo keliya adiga kuu gaar ah.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan codsashada iyo sida aad u heli karto dukumentigaaga safarka waxaad ka heleysaa halkan.

Intaas waxa dheer, waxaad halkan ka heli kartaa tallaabooyinka ay tahay inaad raacdo si aad u cusbooneysiiso dukumiintigaaga safarka oo faahfaahsan.

# Xuquuqda aasaasiga ah

Waxa halkan ku jira liiska xuquuqaha ka dhalanaya helista ilaalinta caalamiga ah, iyadoo la kaala saarayo helista xaal qaxoontimo ama ilaalin hoosaad (ku qoran dhowr luuqadood).

Haddii lagu siiyay xaalad ilaalin caalami ah, waxaad helaysaa xuquuqahan soo socda:

- **Xuquuqda helitaanka adeegga bulshada iyo daryeelka caafimaadka:** Lambarka Caymiska Ajaaniibta iyo Daryeelka Caafimaadka (PAAYPA) ee laguu siiyay magangalyo-doon ahaan si aad u hesho daryeel caafimaad waa in loo beddelaa (si waafasqan waxa loogu yeedho “heerka ku-meelgaarka ah») Lambar Amni Bulsho (AMKA). Ujeedadan awgeed, hal (1) gudaheed oo ka bilaabmeysa markii rukhsadda degenaanshaha lagu siiyay waa inaad qaaddaa dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah bixinteeda, si waafaqsan sharciga. Waqti xaadirkan, adiga iyo qoyskaagaba waxa si buuxda idiin cayminaya PAAYPA. AMKA waa lambar u gaar ah muwaadin kasta oo dalka jooga. Markaad haysato AMKA, waxaad daryeelka bulshada iyo caafimaadka ku helaysaa shuruudo la mid ah kuwa muwaadiniinta Giriigga. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan AMKA iyo daryeelka caafimaadka waxaad ka heleysaa qaybaha ku habboon ee hoos ku xusan.
- **Xuquuqda helista waxbarashada dadwaynaha** ee heer kasta iyo xuquuqda helista barnaamijyada tababarka. Wixii macluumaad dheeraad ah waxaad ka heleysaa qeybta «Waxbarashada».
- **Xuquuqda aad ku geli karto suuqa shaqaalaha iyo xuquuqda aad ganacsi ku sameysanayso.** Qeybta «Shaqada iyo Shaqaaleysiinta», waxaad ka heleysaa macluumaad dheeraad ah oo faa’iido leh. Waxaa intaa dheer, hagahan wuxuu si kooban u sharraxayaa nidaamka lagu heli karo Lambarka Aqoonsiga Canshuuraha (ΑΦΜ), taas oo lagama maarmaan u ah macaamilka aad la yeelanayso Dowladda Giriigga iyo dhowr ka mid ah macaamilka aad la yeelanayso shakhsiyaad gaar ah.
- **Xuquuqda codsashada rukhsad degenaansho muddo dheer,** haddii aad waddanka deganayd muddo shan (5) sannadood ah oo aad buuxisey dhammaan shuruudaha kale, sida ku xusan sharciga.
- Haddii aad heshay sharciga qaxootinimada, **waxaad, iyadoo shuruudo gaar ah ku xiran, xaq u leedahay inaad la midowdo oo laguu keeno xubnaha qoyskaaga dhow ee ku nool waddankaagii ama waddan kale oo saddexaad.** Haddii lagu siiyo sharciga ilaalin hoosaadka, xuquuqdan ma lihid.

- **Xuquuqda aad ku codsanayso jinsiyadda Giriigga (muwaadineyn)** haddii, adiga oo sharci qaxootinimo haysta ama ilaalin hoosaad, aad waddanka Giriigga sifo sharci ah ugu nooleyd muddo todoba (7) sannadood ah oo aad buuxiso shuruudaha isdhexgalka bulshada, sida ku cad sharciga. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan helitaanka dhalashada dalka Giriigga, halkaan ka eeg. Haddii aad leedahay carruur ku dhalatay Giriigga, kuwaas oo ku soo dhameystay waxbarashada aasaasiga ah iyo/ama dugsiga sare Giriigga, waxa laga yaabaa inay xaq u yeeshaan dhalashada Giriigga iyagoo ku xiraya shuruudo kala duwan, sida uu dhigayo sharciyada khuseeya.

Sida uu qabo sharciga dalka Giriiggu, sharciga lagu siiyay waa lagaala laaban karaa ama dib laguugu cusboonaysiin waayayaa. Tani waxay dhici kartaa haddii, tusaale ahaan, haddii xaaladaada qaxootinimo la joojiyo sababtoo ah waxaad ilaalin dib uga heshay waddankaad u dhalatay, waxaad isticmaashay dukumentiyo been abuur ah, waxaad khatar gelisay amniga qaranka ama waxaad ku kacday dambi weyn.

## Sida loo helo Lambarka Amniga Bulshada ee Giriigga (AMKA)

Lambarka Amniga Bulshada (AMKA) wuxuu sahlaa helitaanka adeegyada isbitaalka iyo daryeelka caafimaadka wuxuuna xaqiijinayaa xuquuqdaada shaqo. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan AMKA waxaad ka heli kartaa iyagoo ku qoran Giriig halkan.

Haddii aan lagu siinin mid, waxaad AMKA ka heli kartaa adigoo booqanaya qaybta khaaska ah ee xafiisyada ka masuulka ah Lambarka Amniga Bulshada (Xafiisyada AMKA ) ee sanduuqa Amniga Bulshada ee heer qaran (e-EFKA) ama xarunta Adeegga Muwaadiniinta (ΚΕΠ)ee aagaaga. Macluumaadka ku saabsan sidaad ballan u qabsan lahayd xafiiska e-EFKA waxaad ka helayaaa halkan, macluumaadka macaamilka KEPs waxa isna laga helayaa halkan.

Codsigaaga waa inaad soo raacisaa rukhasadaada degenaanshaha iyo caddeynta goobta aad degan tahay (Qandaraaska kirada / caddeyn ka timi cidda aad la joogto ama mulkiilaha guriga / waraaqda biilka korontada ama biyaha oo magacaagu ku qoran yahay). Intaas waxaa dheer haddii ilmo qoyskaaga ka mid ahi uu ku dhashay Giriigga, waa in aad keentaa shahaadadiisa dhalashada.

## Sida loo helo Lambarka Aqoonsiga Canshuurta ee Giriigga (ΑΦΜ)

Lambarka aqoonsiga cashuuraha (ΑΦΜ) waa lambar gaar ah waxana la baxshaa halmar, waxuuna ka kooban yahay sagaal (9) god. Waa muhiim in aad leedahay Lambarka Aqoonsiga Cashuurta ee Giriigga (ΑΦΜ), maadaama aad u isticmaalayso inaad kula macaamisho adeegyada dadwaynaha oo ay ka mid tahay inaad furatid xisaab bangi, inaad guri kiraysatid, si aad u iibsatid taleefoonka gacanta, si aad u geli karto suuqa shaqada iyo macaamillo dhowr ah oo kale oo maalin kasta la adeegsado.

Marka codsigaaga ilaalada caalamiga ah la diwaangeliyo, waxa aad si toos ah lambarka aqoonsiga cashuurta (AΦM). hadii, si ay noqotaba aadan haysanin lambarka aqoonsiga cashuurta (AΦM), waxa aad codsan kartaa samaysashadiisa adiga oo adeegsanaya wicitaanka muuqaalka ah (video call ka) oo aad la yeelanyso shaqaale ka tirsan maamulka xirfada u leh. Habka aad u baahan doonto inaad raacdo waxa lagu sharaxay Giriiga halkan.

Taas beddelkeed, adiga, ama cid saddexaad oo aad soo idamtay, ayaa booqan karta Xafiiska Cashuuraha ee ugu dhow meesha aad deggan tahay. Haddii aadan aqoon Xafiiska Cashuuraha ee awoodda u leh ee aad u baahan tahay inaad la xidhiidho, waxaad ka raadsan kartaa halkan adoo gelinay cinwaankaaga.

ka dib marka lagu siiyo Lambarka aqoonsiga Canshuuraha (AΦM), ayaad heli kartaa xisaab iyo koodhka **TAXISnet**, kuwaas oo lagama maarmaan u ah helitaanka adeegyada cashuurta ee dhanka khadka iyo adeegyo kale oo badan oo maamulka dadweynaha ah. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan diiwaangelinta nidaamka macluumaadka taxISnet iyo sameynta xisaabaadka waxaa laga heli karaa halkan. Xisaabiye ayaa laga yaabaa inuu yahay qofka ugu wanaagsan inuu hawlan kaa caawiyo oo uu ku hago markaad waddo.

**MUHIIM: Ha iloobin inaad cusbooneysiiso macluumaadkaaga!!!**

Haddii lambarka sharcigaaga degenaanshuhu (AΔET) ama goobtaad degen tahay isbedelaan, waa inaad Xafiiska Cashuuraha ku wargelisaa cinwaankaaga cusub. Cinwaanka gurigaaga elektarooni ahaan ayaa nidaamka TAXISnet looga dhex beddeli karaa, balse haddii aad bedelayso lambarka AΔET, waa inaad la xiriirtaa xafiiskaaga canshuurta.


## Cashuur celi



Si aad u soo gudbiso cashuur celin, waa inaad taageero ka heshaa qof nidaamka yaqaana. Waxaad sidoo kale caawimaad ka raadsan kartaa NGO ama waxaad la xiriiri kartaa xisaabiye.

Cashuur celintu waxay kaa caawin kartaa dalbashada gunnooyinka, maadaama bixinta gunnooyinka qaarkood ku xiran tahay dakhliga sannadlaha ee lagu dhex sheegay cashuur celintaada.

## Sida loo furto Xisaab Bangi



Furashada xisaab bangi waa muhiim oo waxay kaa caawinaysaa inaad lacagtaada si aamin ah ugu kaydsato iyo inaad lacagaha laguugu soo diro. Sidoo kale wixii kaalmo ah oo aad xaq u leedahay waxaa toos loogu shubayaa akoonkaaga bangiga, markii aad shaqo heshona waxaa laguugu soo shubi doonaa mushaarkaaga.

Waxaad kala dooran kartaa bangiyo kala duwan. Dokumentiyada aasaasiga ah ee ay tahay in aad wadato marka aad bangiga tageyso si aad akoon u furato waa kuwan soo socda:

- Sharcigaaga degenaanshaha asalka oo shaqeynaya iyo nuqul aad ka sameysay.
- Caddeynta goobta aad degan tahay (Qandaraaska kirada / caddeyn ka timi cidda aad la joogto ama mulkiilaha guriga / waraaqda biilka korontada ama biyaha oo magacaagu ku qoran yahay). Waxaa muhiim ah in cinwaanka caddeyntan ku xusani uu yahay mid shaqeynaya maadaama uu bangigu cinwaankan la sheegay uu kuu soo diri karo waraaqo muhiim u ah dhameystirka hawsha.
- Waraaq biil ama shahaado ka socoto shirkadda moobeelkaaga oo caddeyneysa in taleefan lambarkaagu ku diiwaangashan yahay magacaaga.
- (Haddii aad shaqaysid) Caddeynta shaqada iyo nuqulka heshiiska shaqada.
- (Haddii aad shaqo la'aan tahay) Kaarka shaqo la'aanta ee asalka ah ee aad ka heshay Xafiiska shaqada (Δ.ΥΠ.Α.) (ee horey loogu yaqaanay Xafiiska Shaqogelinta Shaqaalaha (Ο.Α.Ε.Δ.)) iyo nuqul aad ka soo sameysay.
- Shahaadada lagugu siiyay Lambarka Aqoonsiga Canshuuraha (ΑΦΜ) ama dukumenti kale oo rasmi ah oo muujinaya Lambarkaaga Aqoonsiga Canshuuraha (ΑΦΜ).
- Caddeynta inaad iska bixisay cashuurta ama bayaan sharci ah oo ku sheegayso inaadan cashuur celin dakhli Giriigga ku dhex sameyn.

Marka laguu furo akoonka, badanaa wuxu bangigu kuu raacinayaa kaarka bangiga lacagta ku jirta lagu isticmaalo, kaas oo aad u adeegsan karto inaad lacag kala baxdo akoonkaaga adigoo isticmaalaya ATM-yada (ku yaala bangiga dibadiisa iyo dhowr meelood oo kale) iyo inaad wax kaga iibsato dukaamada intooda badan.



# CUTUBKA 4
## Shaqada iyo Shaqaaleynta





Ka faa'iidayste ahaanshaha ilaalada caalamiga ah, waxaad xaq u leedahay inaad u shaqeyso shaqaale ahaan ama is shaqaalaysiiso (iskii u shaqayste). Waxa kale oo aad furi kartaa ganacsi adiga kuu gaar ah, adiga oo leh xuquuq iyo waajibaad la mid ah tan muwaadiniinta Giriiga. Waxaad helaysaa xuquuqda ah inaad shaqeyso lixdan (60) maalmood ka dib laga bilaabo taariikhda aad buuxisay codsigaaga magangalyada caalamiga ah iyo haddii aad haysato kaarka magangalyada caalamiga ah oo shaqaynaya.

## Shuruudaha shaqada

Shuruudaha lagama maarmaanka ah si aad uga shaqayso Giriigga waa in aad lahaataa Lambarka Aqoonsiga Cashuurta (AΦM) iyo Lambarka Ammaanka Bulshada (AMKA) (si aad u hesho macluumaad ku saabsan nidaamka helista AΦM iyo AMKA fiiri linkiga). Waxaad sidoo kale u baahan kartaa inaad furato akoon bangi si cidda aad u shaqeyso mushaharka kuugu soo dirto (eeg cutubka 3aad wixii la xiriira dokumentiyada loo baahan yahay).

## Iska diiwaangelinta diiwaanka dadka caynsan

Markii ugu horeysay ee qofku shaqo galo waa in laga diiwaangeliyaa Diiwaanka Dadka Caynsan -ee Sanduuqa Sugnaanshaha Amniga Bulshada Qaranka (EΦKKA), si loo siiyo Lambarka Xubinimada Amniga Bulshada (AMA).

Si aad isaga diiwaangeliso Sanduuqa Sugnaansha Amniga Bulshada Qaranka (EΦKA) si laguu siiyo AMA, waa inaad ballan ka qabsato laan kasta oo EΦKA ah oo aad wacdo taleefoonka 1555, ama email ahaan.

**Waxaad u baahan doontaa dukumentiyadan taageerada ah ee soo socda:**

1. Sharcigaaga degenaanshaha asalka oo shaqeynaya (ΑΔΕΤ) iyo nuqul aad ka sameysay.
2. Ogeysiis shaqaaleyneed (Foomka E3) oo ka socda shaqaaleysiiyahaaga.
3. Shahaadada Aqoonsiga Cashuurta (ΑΦΜ) (ama dukumiinti u dhigma oo uu ka muuqdo lambarka aqoonsiga canshuurta (ΑΦΜ) iyo xafiiska canshuuruha, sida warbixinta cashuur celinta dakhliga).
4. AMKA-kaaga (Lambarkaaga Amniga Bulshada)
5. Caddeynta goobta aad degan tahay (Qandaraaska kirada / caddeyn ka timi cidda aad la joogto ama mulkiilaha guriga / waraaqda biilka korontada ama biyaha oo magacaagu ku qoran yahay).
6. Buuga Akoonka Bangiga (nuqul laga sameeyay bogga muujinaya lambarka Akoonka Bangiga) ama, haddii aadan haysan buug bangi, caddeyn fudud oo muujinaysa IBAN-ka akoonkaaga bangiga, oo muujineysa inaad tahay qofka leh akoonka bangiga.

AMA waxa laga soo siin karaa adiga ama mid ka mid ah wakiiladaada idman, Sanduuqa Amniga Bulshada ee Qaranka (ΕΦΚΑ) laantiisa ugu dhow meesha aad degan tahay ama Sanduuqa Amniga Bulshada ee Qaranka (ΕΦΚΑ)laantiisa ugu dhow ciddad aad u shaqeyso, maalinta shaqadaadu ka bilaabmeyso.

## Sida shaqo loo raadsado



Inaad shaqo ka raadsato oo ka hesho Giriigga ma sahlana; waqti ayay qaadan doontaa, waana in aad u diyaar u ahaataa dhibaatooyinka iyo caqabadaha aad kala kulmi doonto.

## CV iyo Warqadda Shaqa Dalbashada




Tallaabada ugu horeysa waa inaad sameysato Taariikhdaada Shaqo-Waxbarasho (CV) oo ay ku jiri doonaan macluumaad ku saabsan waxbarashadaada, khibradaada shaqo, iyo sidoo kale xirfadaha iyo tababarada kale ee aad haysato.

Khaasatan CV-gaaga waa in lagu daraa:

- Macluumaadka shakhsiga ah sida magacaaga, cinwaanka gurigaaga, lambarka telefoonka iyo iimayl lagaala soo xidhiidho;
- Taariikhdaada waxbarasho;
- Waaya aragnimadaadii shaqo ee hore (xirfadle ama mutadawacnimo);
- Xirfadaha iyo tababarka (luuqadaha, aqoonta IT-ga, iwm);
- Waxyaabaha aad xiiseyso;
- Waraaqo ammaan iyo soo jeedino ah oo aad ka socda cidddaad horey ugu shaqeyn jirtay.

Waxaad halkan habyaalka CV-ga iyo talooyin waxtar leh oo ku saabsan sida loo qoro CV iyana waxa laga heli karaa halkan iyo halkan. Waxaa intaas dheer oo aad la xiriiri kartaa islamarkaasna caawimaad weydiisan kartaa dhowr hay'adood oo bixiya adeegyada qaxootiga, sidoo kalena bixiya hagis iyo taageero ku saabsan qoraalka CV'ga.

## Wareysiga shaqada

Haddii shaqo-bixiyuhu ka helo CV-gaaga marka uu qiimeeyo, badanaa tallaabada xigtaa waa inuu wareysi kuugu yeedho. Wareysigu aad ayuu muhiim u yahay, maada uu yahay kulanka koobaad ee aad isku arkaysaan qofka xiiseynaya inuu ku shaqaaleysiiyo. Isagoo adeegsanaya nidaamyo xiriir ee hadalka iyo kuwa aan hadalka ahaynba, ayuu qofka aad mustaqbalka u shaqeyn lahayd fikirkiisa ugu horeeya kaa qaadan doonaa oo uu qiimeyn doonaa inaad ku habboon tahay booska shaqo ee uu hay/ ay hayso. Waxaad halkaan ka heleysaa talooyin faa'iido leh iyo warbixin ku saabsan nidaamka wareysiga iyo diyaarintiisa.

## Adeeg Shaqaaleysiinta ee Dadwaynaha (Δ.ΥΠ.Α.), Horey loo oran jiraya Xafiiska Shaqada Shaqaalaha (Ο.Α.Ε.Δ.)

Mid ka mid ah siyaabaha loola xiriiri karo shaqo-bixiyayaasha suurtogalka ah waxaa ka mid ah adigoo adeegsanaya adeegyada shaqo-abuurka dadwaynaha ee loogu talagalay cududa shaqaalaha. Hay'adda ugu weyn ee Giriigga waa Adeegga Shaqaaleynta Dadwaynaha (Δ.ΥΠ.Α.) Horey loo oran jiraya Xafiiska Shaqada Shaqaalaha (Ο.Α.Ε.Δ.) Δ.ΥΠ.Α. waxay hawlgelisaa Xarumaha Dhiirigelinta Shaqada (Κ.Π.Α.Α.), oo ay dadka bilaa shaqada ah la xiriiri karaan (iyada oo ku xiran meesha ay dagan yihiin) si ay la taliyayaasha shaqo-helista uga helaan macluumaad ku saabsan arrimaha shaqo raadinta. Sidaa awgeed, waxaa muhiim ah in la iska diiwaangeliyo Diiwaanka Shaqo doonka ee Δ.ΥΠ.Α. Iska diiwaangelinta Δ.ΥΠ.Α. haysashada kaarka shaqo la'aanta waxaad ku heli kartaa xuquuqo iyo mudnaan fara badan, sida tigidh lacag la'aan ah ama qiimo jaban oo aad ku raaci karto gaadiidka dadwaynaha, helista gunnooyinka shaqo-la'aanta iyo in lagaa taageero inaad shaqo hesho ka dib marka shaqada lagaaga fadhiisiyo. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habka iyo dukumentiyada lagama maarmaanka ah ee hawshan kaa taageeraya waxaad ka heli kartaa halkan.

## Internetka

Qaabka ugu badan ee shaqada lagu raadiyo waxa loo adeegsadaa internetka. Waxaa jira bogag shaqo-bixiyayaashu soo dhigaan shaqooyin maalin walba, markaas waxa fiican inaad sida ugu badan ee suurtogalka ah u booqato bogagaas. Bogag internet oo aad soo dhigi karto CV-gaaga oo aad ka heli karto shaqo kugu habboon oo la xayaysiinayo ayaa hoos ku yaal:

- Kariera.gr
- xe.gr
- Skywalker.gr
- Jobs-finder.gr
- Generation 2.0

Intaas waxaa sii dheer, haddii aad tahay qaxooti ama magan-gelyo doon oo aad raadineysid shaqo, barnaamij tababar, ama aqoon isweydaarsi, waxaad booqan kartaa bogga internetka ee Adama Job Center, oo ay sameysay hay'adda Gargaarka Katooliga (Crs) oo kaashanaysa UNHCR, hay'adda QM ee Qoxootiga ee Giriigga.

## Xuquuqaha iyo waajibaadka Shaqaalaha

Xuquuqdaada shaqaalenimo waxa loo aasaasay qof kasta oo shaqaale ah iyadoon loo eegeyn inuu Giriig yahay iyo ajaanib toonna waxaana ka mid ah: heshiiska shaqada, mushaharka aasaasiga ah, fasaxa, saacadaha dheeraadka ah, amniga bulshada, daryeelka caafimaadka.

Haddii shaqo laguu qorto, waa inaad (b) sixiixdaa heshiiska shaqada; iyo (t) ku biirtaa nidaamka Amniga Bulshada ee waajibka ah. Heshiiska shaqadu waa nooc heshiis ah oo ka dhexeeya shaqaalaha iyo shaqo-bixiyaha. Heshiiska waxaa saxiixaya adiga iyo shaqo-bixiyahaaga, waana in aad nuqul ka haysataa. Qofka shaqaalaha ah iyo shaqo-bixiyahaba waxa waajib ku ah u hogaansanka shuruudaha la isku raacay ee ku qoran heshiiska ka dib marka ay saxiixaan.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan noocyada heshiisyada, sida loo joojin karo iyo guud ahaan xuquuqdaada shaqaduna waxaad ka heleysaa halkan.

## Lacagaha shaqo la'aanta iyo dadka dakhligoodu hooseeyo

Haddii aad tahay qaxoonti la aqoonsan yahay ama qof helay ilaalin hoosaad oo haysta rukhsad degenaansho oo shaqeynaysa, waxaad heli kartaa lacagta Nidaamka Kaalmada Qaranka. Macluumaadka ku saabsan faa'iidooyinka kala duwan waxaa laga heli karaa gudaha Giriigga, bogga ururka Giriigga ee Gargaarka Daryeelka Iyo Midnimada Bulshada (ΟΠΕΚΚΑ).

Kuwani waa qaar ka mid ah kaalmooyinka aad aad xaq u yeelan karto:

- Dakhliga ugu yare ee aad helayso oo mudamin ah
- Kaalmada Ilmaha
- Kaalmada hoyaadka
- Kaalmada Wadajirka Bulsho ee loogu talagalay Dadka Aan Caymisnayn
- Kaalmada dadka naafada ah

Macluumaadka muhiimka ah ee ay tahay in la ogaado waa in bixinta gunnadu ay ku xiran tahay shuruudaha dakhliga, hantida iyo degenaanshaha.

Wixii macluumaad ah, hagis iyo taageero la xiriira arrimaha shaqaaleynta iyo nidaamyada shaqada iyo sida aad ula qabsaneyso suuqa shaqada waxaad kala xiriiri kartaa mid ka mid ah xarumaha Dal laqabsiga ee Soo-galootiga (KEM), ee ka shaqeeya degmooyinka la xulay. Macluumaadka ku saabsan KEM waxaad ka heli kartaa halkan.

# CUTUBKA 5
# Hoyaadka



# Barnaamijyo/qorsheyaal hoyaad oo loogu talagalay ka faa'iideysatayaasha Ilaalinta Caalamiga ah

### Mashruuca "HELIOS"

Marka la eego mashruuca "HELIOS" oo ah barnaamij taageero is-dhexgal ah oo loogu talagalay dadka helay ilaalinta caalamiga ah (qaxootiga iyo dadka helayb ilaalin hoosaad) oo ay hirgelisay Hay'adda Caalamiga ah ee Socdaalka (IOM) oo taageero ka helaysa dawladda Giriigga, waxa dadkaas laga taageeraa helista guri iyo dhameystirka hawlaha lagama maarmaanka u ah in heshiis kiro aad la gasho mulkiilaha guriga. Waxa dhici karta in ka faa'iideysteyaasha barnaamijkan kharashka kirada iyo guuritaanka lagaa kaalmeeyo. Waxaad ka baran kartaa wax badan oo ku saabsan shuruudaha iyo habka diiwaangelinta mashruuca "HELIOS" halkan.

### Kaalmada Hoyga ee Billaha ah

Barnaamijkani wuxuu u furan yahay qaybaha kala duwan ee ka-faaiideysteyaasha, oo ay ku jiraan ka-faaiideysteyaasha ilaalinta caalamiga ah ee si sharci iyo joogto ah ugu noolaa Gariigga ugu yaraan shan (5) sano ka hor intaanay soo gudbin codsiga ka-qaybgalka barnaamijka (ΟΠΕΚΑ).

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan kaalmadaan, sida shuruudaha ay tahay inuu buuxiyo qof kasta oo qoyska ka mid ah, xaddiga lacagta kaalmada iyo habka codsiyada, waxaad ka heli kartaa Xarumaha La Qabsashada Soo-galootiga ee deegaanka (KEM) (linkiga ku habboon ka eeghalkan) ama Xarunta Bulshada ee Degmadaada (linkiga ku habboon ka eeg halkan).

### Barnaamijka «Guriyeynta iyo Shaqada»

Barnaamijkan waxaa loogu talagalay shakhsiyaadka iyo qoysaska ku nool nolol hoy la'aan ah, waddooyinka ama hoy aan ku filnayn. Barnaamijku wuxuu bixinayaa kaalmada kirada mudo dhan ilaa sideed iyo toban (18) bilood iyo daboolida kharashaadka aasaasiga ah ee alaabta guryaha iyo adeegayada, iyo sidoo kale kaalmada shaqo oo muddo illaa laba iyo toban (12) bilood ah. Isla mar ahaantaas, wuxu taageero nafsiyadeed siiyaa dadka ka faaiidaysanaya, iyadoo ujeeedadu tahay in awood loo siiyo laguna abaabulo inay si tartiib ah mas'uul uga noqdaan sidii ay u xalin lahaayeen dhibaatooyinkooda maalinlaha ah, isla markaana si habsami leh ay dib ugu darmi karaan bulshada.

Barnaamijka waxaa bixiya Degmooyinka doortay inay ka qaybtaan oo qura. Haddii aad tahay qof hoy la'aan ah oo aad jeceshahay in aad ogaato in barnaamijka laga hadalayo laga hirgeliyey degmadaada, waxaad la xiriiri kartaa Xarumaha La Qabsashada Soo-galootiga ee deegaanka (KEM) ee xaafadaada ama Xarunta Bulshada ee Degmadaada (linkiga ku habboon kor ka eeg).

# Macluumaad Ku Saabsan Guryaha Kirada Ah

Waxaad ka raadsan kartaa guri kiro ah:

- Dhanka Khadka, bogga internetka ee loogu talagalay ee Hay'adda Caalamiga ah ee Socdaalka iyo mashruuca «HELIOS», https://www.heliospiti.com/ (EN). Halkaas ayaad ka helaysaa liisaska guryaha kirada ah, kuwaas milkiilayaashooda hay'adda IOM ay la xiriirtay oo ay kula heshiiyeen in ay hantidooda ka kireeyaan ka faa'iideysatayaasha barnaamijka «HELIOS».
- Dhanka khadka, bogaga lagu xayaysiiyo guryaha kirada ah ee deegaanka sida: xe.gr (EN/GR), spitogatos.gr (EN/GR), tospitimou.gr (EN/GR), spiti24.gr (EN/GR/AR/FR), spiti360.gr (EN/GR), plot.gr (EN/GR).
- Wargeysyada maxalliga iyo kuwa dalka oo dhan oo leh qayb lagu xayaysiisyo guryaha kirada ah (badanaa waxay leeyiihiin cinwaan ah "Kiro").
- Wakiilada shirkadaha guryaha Wakiiladani waxay adeegyada ka qaadan lacag; caadiyan kharashku waa mid la qiimo ah bil kiradeeed.
- Shabakadaha bulshada sida Facebook, qeybta Suuqa-iibka.
- Macluumaad laga helo qaraabada, asxaabta, dadka aad wada sahqeysaan ama bulshada.

Waad booqan kartaa guriga aad rabtid inaad kireysatid, ka dib markaad horey ula sii xiriirto mulkiilaha ama wakiilka metelaya, si aad u eegto in xaalkiisu fiican yahay. Waligaa ha kiraysan guri aad sawirro uun ku aragtay.

Si heshiisku u sameysmo oo loo dhammeystiro, waa in adiga iyo mulkiilaha gurigu marka hore ku heshiisaan shuruudaha, kuwaas badanaa khuseeyaa kirada billaha ah, muddada heshiiska kirada, korodhka kirada ee sannadlaha ah iyo tirada dadka deganaan doona guriga. Haddii gurigu ku yaalo dhisme guryo badan leh, waa inaad sidoo kale waydiisaa kharashaadka wadaaga ah ee aad bixin doonto bil kasta.

Haddii ka hesho guriga oo aad aqbasho shuruudaha mulkiilaha, waa inaad heshiis kiro deegaan oo gaar ah la saxiixdaa. Si aad u saxiixdo heshiiska kirada, waa in aad heysataa sharci degenaansho oo shaqeynaya iyo Lambarka Aqoonsiga Canshuuraha ee Giriigga (AΦM). Markaad heshiiska saxiixdo, waxaa kugu waajibaysa inaad siiso qofka milkiilaha ah bisha ugu horeysa ee kirada guriga, iyo weliba xaddi damaanad ah aad aqbali doontid inaad bixiso (oo sidoo kale loo yaqaano deebaaji). Lacagta deebaajiga oo dhamaystiran waxa laguu soo celinayaa dhamaadka kirada, haddii aad ku soo celisid guriga sidii lagaaga kireeyay.

Ka dib marka uu saxiixo heshiiska kirada, milkiilaha ayaa si elektaroonik ah nidaamka TAXISnet ugu dhex sheegi doona dhammaan faahfaahintiisa / faahfaahinteeda. Kadib markii uu milkiiluhu dhameystiro soo gudbinta, nidaamku wuxuu iimayl ku soo diri doona akoonka TAXISnet ee aad haysato, waana inaad heshiiska kirada onlayn ahaan u aqbasho.

Heshiiska kirada ee gaarka ahi waa heshiis ka dhexeeya dhammaan dhinacyada ay khuseyso kirada gurigu, kaas oo ay ku qoran yihiin xuquuqda iyo waajibaadyadooda, ee mudadda kirada ee heshiiska ku dhex xusan. Waa inaad hubsataa inaad fahamsan tahay dhammaan qodobada heshiiska lagu xusay ka hor inta aadan saxiixin.

Guri kireysashada waxaa loola jeedaa xuquuqaha iyo waajibaadka ay tahay in aad u hoggaansantid. Waa muhiim ah in aad ku bixiso kirada billaha ah taariikhda aad kula heshiisay mulkiilaha. Haddii lacagbixintu daahdo, waxa lagula talinayaa inaad mulkiilaha sida ugu dhaqsaha badan.

Kireystuhu waa inuu ka bixiyaa biilasha adeegga (sida biyaha, korontada, taleefoonka, iwm) guriga kirada ah iyo sidoo kale qayb ka mid ah kharashaadka wadaagga ah ee ka jira dhismaha/dabaqa gurigu ee ku yaallo.

Macluumaad faa'iido leh oo ku saabsan nidaamka iyo arrimaha kireysiga guryaha waxaad ka heli kartaa halkan muuqaallo la xiriira ayaad sidoo kale ka heli kartaa halkan.



# Cutubka 6
# Waxbarashada




© UNHCR / Socrates Baltagiannis

Waxaad qaybtan ka heli doontaa macluumaad ku saabsan waxbarashada dalka Giriigga, sida aad ilmahaaga iskuulkau qori karto haddii aad tahay waalid ama masuul, iyo sida ay u heli karaan taageero dheeri ah. Waxaad sidoo kale helaysaa macluumaad ku saabsan waxbarashada, tababarada dhalinyarada iyo dadka waaweyn, fursadaha barashada luuqadda Giriigga iyo siyaabaha aad ku baran kartid xirfado shaqo oo dheeri ah.

## Nidaamka waxbarashada Giriigga



Nidaamka waxbarashada ee Giriigga waxaa mas'uul ka ah oo kormeeraya Wasaaradda Waxbarashada, Cilmibaarista iyo Arrimaha diinta. Waxbarashada Giriigga waa u lacag la'aan dadka oo dhan waana ku qasab dhammaan caruurta laga u dhexaysa afar (4) illaa shan iyo toban (15) sano, wiilal iyo gabdhoba, oo ay ku jiraan carruurta qaxootiga ah. Ilmo kasta waxa bilaash lagu siin doonaa buugaag, halka agabyada kale ee qoraalka iyo buugta wax lagu qoro laga rabo inay waalidiinta ama dadka ilmaha ka masuulka ahi bixiyaan.

Heerarka waxbarasho ee soo socda waa qasab:

- Dugsiga barbaarinta (4-6 sano jir)
- Dugsiga hoose (6-12 sano jir)
- Qaybta Hoose ee Dugsiga Sare(12-15 sano jir)

Cunug kasta oo da'ha sare jiraa waa in isagoo ay waalidiintiisu ama cidda ka mas'uulka ahi ka warheyso dugsi la qoraa, maalin walbana uu fasalada aado. Caadiyan sannad dugsiyeedku waxa ku bilowdaa Sibteembar kuna dhammaad Juun-ta sannadka xiga. Carruurta qaxootiga ahi waxa ay xaq u leeyihiin in ay helaan waxbarasho illaa iyo inta ay waddanka joogaan.

Codsiyada is-diiwaangelinta waxaa lagu soo gudbiyaa internetka iyadoo la soo raacinayo dukumeentiyada khaaska ah ee lagu taageerayo. Haddii aadan haysan dukumentiyada taageerada ah ee loo baahan yahay, qof ka masuulka ah heerka waxbarasho ayaa kaa caawin doonaa kaana kaalmeyn doona nidaamaka lagu helayo markaad doorato inaad naftaada ilmaha dugsi qortid.

Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heleysaa halkan.

## I. Waxbarashada caruurnimada hore iyo barbaarinta

**Diiwaangelinta Xanaanada, Xarumaha Daryeelka caruurta ee maalinta iyo rowdooyinka**

Carruurta ka yar afar (4) sano, waxaa jira dugsiyada xanaano carruureedka rowdooyinka iyo/ama dugsiyada barbaarinta, kuwaas oo hoy u ah dhallaanka iyo caruurta da'doodu u dhexayso lix (6) bilood iyo xarumaha daryeelka caruurta ee maalintii kuwaas oo haya caruurta da'doodu gaareyso laba iyo bar (2.5) sannadood illaa iyo intay ka gaarayaan da'da waxbarashada khasabka ah. Iskuuladan waxa si gaar ah uga shaqeyn kara maamulka gobolka ama ka degmooyinka. Wixii macluumaad dheeraad ah, waxaad la xiriiri kartaa Degmada aad ku nooshahay.

Dugsiyada xannaanada caruurta ee dadwaynuhu Giriigga waa bilaash oo dhammaan wiilasha iyo gabdhaha jira afar (4) iyo shan (5) sannadood waa in la qoraa. Caruurta afar (4) sannadood noqonaya 31-ka Diiseembar ee sannadka ay isqoristoodu xaq ayay u leeyihiin in la qoro xannaanada carruurta ee dadweynaha. Si aad u codsato caruurtaada la qoro xannaanada dawladda, waa inaad caddeysaa inay tahay markii ugu horeysay ee caruurtu ay galeen xannaano oo aanay horey u qorneyn dugsi kale.

Waxaad u baahan doontaa:

- Koodhadhkaaga shakhsiyeed ee aad ku gasho Taxisnet;
- Nambarka taleefonkaaga gacanta;
- Caddaynta cinwaanka halka aad sida joogtada ah u deggan tahay.

Haddii aad qabto su'aalo ama dhibaatooyin kala kulanto nidaamka is-diiwaangelinta, waxaad la xiriiri kartaa xannaanada caruurta ee ugu dhow meesha aad joogtada u deggan tahay.

## II. Waxbarashada Dugsiga Hoose iyo Qaybta Hoose ee Dugsiga Sare

**Diiwaangelinta Dugsiga Hoose iyo Qaybta Hoose ee Dugsiga Sare**

Haddii ilmahaagu jiro inta u dhexaysa lix (6) sano iyo laba iyo toban (12) sano, waa in la qoraa dugsiga hoose ee gurigaaga ugu dhow, haddii uu u dhexeeyo laba iyo toban (12) iyo shan iyo toban (15) sano, waa in la qoraa Qaybta Hoose ee Dugsiga Sare. Haddii aanad ku hadlin afka Giriigga, waxaa jira fasalo soo dhoweyn ah oo gaar ah, kuwaas oo aad macluumaadkooda dheeraadka ah ka heli doontid hoos.

Haddii ilmahaagu uu dhigto iskuul ku yaal dal kale, waa in aad keentaa caddeyn ku habboon ama aad sheegtaa inta sannadood ee uu soo dhigtay ilaa hadda iyo waddanka uu ka soo dhigtay.

Is-diiwaangelintu waxa la sameyn karaa waqti walba oo ka mid ah sanad-dugsiyeedka. Sidaas darteed, waa inaad booqataa Dugsiga Hoose ama Qaybta Hoose ee Dugsiga Sare ee xaafadaa-daada oo aad sii qaadataa dukumeentiyadan soo socda:

- Shahaadada dhalashada;
- Shahaadada talaalka;
- Caddeynta deganaanshaha (macluumaad dheeraad ah waxaa laga helayaa halkan);
- Sharciga degenaanshaha khaaska ah (ΑΔΕΤ) ee ilmahaaga.

Intaas waxa dheer, inta diiwaangelinta la wado waxa lagu waydiin doonaa Diiwaanka Caafi-maadka Shakhsiga ah ee Ardayga. Macluumaadka ku saabsan diiwaankaan waxaa laga heli ka-raa halkan.

Marka uu ilmahaagu dhammeeyo dugsiga hoose waxa is otomaatig ah loo qorayaa qaybta hoose ee dugsiga sare.

Caruurta waxa la qoraa Dugsiga Hoose iyada oo aan loo eegayn inay ka diiwaangashan yi-hiin degmo ama diiwaano kale toonna, oo maamulayaasha dugsiyadaas ayaa ka masuul ah diiwaangalintooda. Maamulayaasha Dugsiyada Hoose waa in aysan wax carqalad ah kala hor iman diiwaangelinta caruurta iyadoo ay sabab u tahay inaysan hayn caddeynta sharciga de-genaanshaha, waana inay aqbalaan caddeyn kasta oo, markay fikirkooda ku qiimeeyaan, lagu go'aamin karo cinwaanka ardeygu deggan yahay.

**Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan ka qaybgalka cunuggaaga ee xanaanada carruurta iyo dugsiyada hoose ee dalka Giriigga waxaad ka heli kartaa tusaha iskuulada oo ay soo saartay Wasaaradda Waxbarashada Iyo Arrimaha Diinta oo aad ka heli kartid iyadoo ku qoran luuqad-da Giriigga** halkan.

## III. Waxbarashada Dugsiga Sare ee Aan Khasabka Ahayn



### Dugsiyada Sare ee Guud iyo Kuwa Farsamada-gacanta

Min lix iyo toban (16) ilaa siddeed iyo toban (18) sano, ardaydii ka qalin jabisay Qaybta Hoose ee Dugsiga sare ka dib markay dhammeystaan sannadka 3aad waxay sii wadan karaan oo dhammeystiran karaan waxbarashadooda dugsiga iyagoo geliya Qaybta Sare ee Dugsiga Sare.

Qaybta Sare ee Dugsiga Sare ee Guud iyo Dugsiga Farsamada gacanta waxa loogu talagalay ardayda dhameysatay fasalka saddexaad ee Qaybta Hoose ee Dugsiga Sare mana aha waxbarasho khasab ah. Muddada Dugsiga Sare ee Guud iyo ta Farsamadu Gacanta labaduba waa saddex (3) sano. Labaduba waxay ku siinayaan fursad aad ku gasho imtaxaano aad ugu sii gudbeyso waxbarasho sare. Waxa macluumaad waxtar leh oo ku saabsan diiwaangelinta waxbarashoo ee naftaada ama caruurtaada laga helayaa halkan.

## IV. Fursado Waxbarasho Oo Gaar Ah Oo Loogu Talagalay Dadka Qaxootiga Ah

### Fasalada Soo Dhaweynta - Zep (Aagagga Mudnaanta Waxbarashada)

Ujeedada ZEPs waa in dhammaan ardayda si siman looga qaybgeliyo nidaamka waxbarashada, iyada oo loo marayo hirgelinta waxqabadyo taageero ah oo lagu horumarinyo heerka waxbarasho, sida diyaarinta fasalo soo dhawayn/kaabis ah. Dugsiga aad ilmahaaga qortay waxa laga yaabaa inuu yeesho Fasal Soo-dhawayn/kaabis ah, si ilmahaaga looga taageero maadooyinka guud ee dugsiga.

### Xarumaha Soo-dhawaynta iyo Waxbarashada loogu talagalay Carruurta Qaxootiga (Δ.Υ.Ε.Π.)

Xaruma soo dhawaynta waa qayb gaar ah oo ka tirsan waxbarashada loogu talagalay caruurta qaxootiga ah, ujeedadooduna waa in caruurta qaxootiga laga taageero la qabsiga nidaamka waxbarasho. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Δ.Υ.Ε.Π. waxa laga helayaa halkan.

## V. Waxbarashada Dadka Waaweyn

### Shahaadada Barashada Luuqadda Giriigga

Qaybta ugu muhiimsan la qabsigaaga iyo ku noolaanshahaaga Giriiggu waa barashada luuqadda Giriigga.

Koorsooyinka luuqadda Giriigga waxa baxsha haayado, ururo iyo macaahid waxbarasho oo kala duwan. Warbixin kooban oo ku saabsan hay’adaha koorsooyinkan bixiya, iyo weliba faahfaahintooda xiriir waxaad ka heleysaa halkan.

### Imtixaanada Lagu Helo Shahaadada Luuqadda Giriigga

Kadib markaad dhamaysato koorasyada luuqada Giriigga, waxaad ka geli kartaa imtixaanaadka luuqada Giriigga si aad u hesho shahaadada ku habboon. Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan shahaadada luuqada Giriigga waxaad ka heleysaa halkan.

### Dugsiyada fursadda labaad

Haddii aad ka weyn tahay sideed iyo toban (18) sano islamarkaana aadan dhameysan waxbarashda khasabka ah, waxaad codsan kartaa inaad lagu qoro oo aad ku biirto Dugsiyada Fursadda Labaad. Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heleysaa halkan. Dukumiintiyada taageeraya ee aad u baahan tahay iyo macluumaadka habka codsiga waxaad ka helaysaa halkan.

### Xarumaha Waxbarashada Abadiga ah

Degmooyinka dalku waxay leeyihiin Xarumaha Waxbarashada Abadiga ah. Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan Xarumaha Waxbarashada Abadiga ah waxaad ka heleysaa halkan.

### Dugsiyada Ku Tababarashada Farsamada Gacanta ee Adeega Shaqaaleysiinta Dadwaynaha (Δ.ΥΠ.Α.)

Macluumaad ku saabsan Dugsiyada Ku Tababarashada Farsamada Gacanta ee Adeega Shaqaaleysiinta Dadwaynaha (Δ.ΥΠ.Α.) waxa laga heli karaa halkan.

### Machadyada Tababarka Farsamada-gacanta

Machadyada Tababarka Xirfadaha Dadweynaha ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Arrimaha Diinta (Δ.Ι.Ε.Κ.) koorsooyinka waxaa lagu bixiyaa lacag la'aan. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Machadyada Tababarka Xirfadaha Ee Dadweynaha ayaad ka heleysaa halkan.

**Wixii macluumaad ah, hagis iyo taageero la xiriira arrimaha waxbarashad dadka waawayn ah, waxaad kala xiriiri kartaa mid ka mid ah Xarumaha Dal Laqabsiga Ee Soo-galootiga (KEM), ee ka shaqeeya degmooyinka la xulay. Macluumaad ku saabsan Xarumaha Dal Laqabsiga Ee Soo-galootiga waxaad ka heleysaa** halkan.

## VI. Helitaanka Tacliinta Sare ee Jaamacadda



Wixii macluumaad guud ah, dukumiintiyada loo baahan yahay ee taageerada ah iyo u gudbinta codsi Haayadaha Tacliinta Sare, waxaad ka helaysaa halkan.

# CUTUBKA 7
# Daryeelka caafimaadka



## Macluumaad guud

Haddii Giriigga lagugu siiyay ilaalin caalami ah, waxaad xaq u leedahay inaad hesho daryeelka caafimaadka asaasiga ah, ka xiga iyo mid sad-dexaadba. Waxaad daryeel ka raadsan kartaa isbitaalada dadweynaha, xarumaha caafimaadka dadweynaha, xarumaha caafimaadka iyo rugaha la talinta bulshada. Haddii aad la kulanto xaalad degdeg ah, tusaale ahaan haddii aad wajahaysoxaalad caafimaad oo degdeg ah, waxaad wici kartaa khadka qaranka ee 166. Taas beddelkeed, waxaad aadi kartaa Waaxda Gargaarka degdega ah ee isbitaalka. Macluumaad ku saabsan isbitaalada leh Waaxda Gargaarka Degdegga ah iyo sidoo kale saacadaha ay shaqeeyaan waxaad ka haleyaa halkan

Haddii aad rabtid inaad ballan ka qabsatid xarumaha caafimaadka, waxaad raaci kartaa qaababkan soo socda midkood:

1. Wac khadka qaranka ee **1535** oo raac tilmaamaha (Giriig – Ingiriisi)
2. Toos u wac isbitaalka aad doorատay.
3. Wac khadka qaran ee **14900**, kaas oo khuseeya adeegyada caafimaad ee xarumaha caafimaadka ee Machadka Caymiska Qaranka (IKA) oo raac tilmaamaha la xiriira.

Waxaa kale oo jira qaybo caafimaad oo maxalli ah (TO. M.Y.), kuwaas oo ah unugyo bixiya adeegyada daryeelka caafimaadka aasaasiga ah oo u shaqeeya heer deegaan ahaan. Si aad adeegyo caafimaad uga hesho TO.M.Y, waa inaad iska diiwaangelisaa kuwa ku yaal magaaladaada ama xaafadaada, haddii ay ku yaalliin.

Liiska dhammaan isbitaallada ku yaal Giriigga ee Wasaaradda Caafimaadku ansixisay waxaad ka helaysaa halkan.

## Rugaha caafimaadka ee degmada

Degmooyin badan ayaa leh xarumo caafimaad, halkaas oo dhammaan dadka haysta ilaalinta caalamiga ah (ee leh ama aan lahayn AMKA) ay ka heli karaan adeegyada caafimaadka aasaasiga ah ee laga bixiyo xarumaha gaarka ah (waxaad ka macluumaad dheeraad ah halkan iyo halkan).

## Xarumaha caafimaadka ee ay maamulaan Hay'adaha Aan Dawliga Ahayn

Waxaa jira xarumo iyo rugo caafimaad oo ay maamulaan dhowr NGO oo siiya dadka haysta ilaalinta caalamiga ah ee ku nool Giriigga adeegyo caafimaad oo kala duwan. Wixii macluumaad dheeraad ah ee la xidhiidha rugaha caafimaadka, oo ay ka mid yihiin cinwaanadooda iyo adeegyada caafimaad ay baxshaan, iyo sidaad ula socoto boos qabsigaaga, waxaad wici kartaa lambaradan soo socda:

**Dhakhaatiirta Adduunka (Médecins du Monde / MdM):** 0030 210 3213150

**Dhakhaatiirta aan Xuduudda Lahayn (Médecins Sans Frontières/MSF):** 0030 210 5200500

**Bisha Cas ee Giriigga:** 0030 210 3613848

**PRAKSIS:** 0030 210 8213704

**Wadajirka Hadda:** 0030 210 6772500

**BABEL, Qaybta Caafimaadka Maskaxda ee Dadka Soo Galootiga ah:** 0030 210 8616280, 0030 210 8616266

## Daryeelka Farmeshiga



Si aad daaweyn iyo daawo u hesho, iyadoo bilaash ah ama lacag yar lagaa qaadayo, waa inaad daawo dhakhtar kuu soo qoray ula tagtaa isbitaalada ama xarumaha caafimaadka. Haddii aad haysato AMKA/PAAYPA oo daawadaadana onlaynka lagaaga soo qoro, daawadaada waxaad ka helaysaa farmeshi kale.

Haddii aadan haysan AMKA/PAAYPA, balse aad haysato daawo uu kuu soo qoray dhakhtar jooga isbitaal dawladeed ama xarun caafimaad, xitaa mid gacanta lagu qoray, waxaad daawooyinkaaga oo bilaash ah ka heli kartaa farmashiyaha ama xarunta caafimaadka ee daawada soo qortay.

## Adeegyada caafimaadka dhimirka



Haddii aad isku aragto walwal, walaac, murugo, kelinimo, cadho ama niyadjab, waa in aad booqataa dhakhtar ku takhasusay (dhakhtar cilmi nafsi yaqaan ah ama dhakhtarka dhimirka). Sida ay qabto siyaasadda ka jirta dalka Giriigga, waxa aad dawooyinka dhimirka ku heli kartaa bilaash, xitaa haddii aadan haysan lambarka PAAYPA ama AMKA. Dalka Giriigga, daawooyinkani waxay ka tirsan yihiin qayb daawooyin ah oo gaar ah oo loo yaqaanno “daawooyinka dhimirka iyo neerfayaasha” oo waxa maamulo shuruuc khaas ah. Daawada noocan oo kale ah waa in uu qoraa dhakhtarka dhimirka ama neerfaha oo ka shaqeeynaya isbitaal guud ama kuwa gaarka loo leeyahay iyo/ama xarumaha iyo unugyada daryeelka caafimaadka aasaasiga ah.

## Tallaalka Guud

Sanad walba Wasaarada caafimaadku waxay go'aan ka gaartaa Barnaamijka Tallaalka Qaranka ee dadka waawayn kuwaas oo ah tallaalo lagula taliyo ama aan lagula talin dadka waawayn iyadoo ku xiran da'da, xaaladaha caafimaad ee ay qabaan iyo shuruudo kale. Inaad haysato AMKA waxay ku siinaysaa fursad talaal **oo lacag la'aan ah oo aad ka helayso dhammaan goobaha caafimaadka dadweynaha.**

Sidoo kale, Wasaaradda Caafimaadku waxay sannad kasta soo diyaarisaa Barnaamijka Tallaalka Caruurta iyo Dhalinyarada ee Heer Qaran. Tallaaladа waxa sidoo kale lagu baxshaa Xarumaha Ilaalinta Hooyada iyo Dhallaanka. Faahfaahin dheeraad ah ayaa laga helayaa halkan.



# CUTUBKA 8
# Macluumaad Waxtar leh iyo adeegyada la heli karo



## Xarumaha Dal-laqabsiga Soo-galootiga (K.E.M.)



Xarumaha Dal-laqabsiga Soo-galootigu (K.E.M.) waxay laamo u yihiin Xarumaha Bulshada re Degmada. Hadafkoodu waa in ay wargeliyaan, u adeegaan, oo adeegyo khaas ah siiyaan muwaadiniinta waddan saddexaad. Intaas waxa dheer, waa inay taageeraan dedaalada isku xirka, oo ay cid kasta oo la soo xiriirta ku xiraan adeegyada iyo barnaamijyada isdhexgalka bulshada oo ay dhaqangeliyaan hawlaha isla qabsiga bulshada. Tusaale ahaan, waxay bixiyaan koorsooyin luuqadda Giriigga ah iyo aqoonta aasaasiga ah ee taariikhda Giriigga, oo ay weheliso fulinta hawlaha dhaqan-wadaag ee awoodda saaraya wada noolaanshaha caruurta iyo ajaanibta dhalinyarada ah iyo dadka deegaanka, iyo hawlaha lagu horumarinayo qaabkay qaxoontiga iyo dadka haysta ilaalinta caalamiga ah ku geli lahaayeen suuqa shaqada.

Xarumaha Dal-laqabsiga Soo-galootiga waxay hadda ka shaqeeyaan degmooyinkan soo socda:

- Athens
- Piraeus
- Kallithea
- Thessaloniki
- Kordelio - Evosmos
- Thiva
- Lamia
- Andravida - Kyllini
- Heraklion
- Lesvos
- Trikala

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Xarumaha Dal-laqabsiga Soo-galootiga waxaad ka helaysaa halkan.

## Golayaasha Dal-laqabsiga Qaxootiga iyo Soo-galootiga (Σ.Ε.Μ.Π.)



Ka qaybgalka hawlaha waddaniyiinta wuxu aad muhiim ugu yahay bulshada, si loo abuuro xaalad isbarasho iyo is-aqbal wada jir ah. Si loo xoojiyo mataladaada arrimaha khuseeya bulshada deegaanka ee aad xubin ka tahay, waxaa jira qodobo qodobo sharci oo asaasay oo maamula haayado la talineedkhaas ah oo loo yaqaan Golaha Dal-laqabsiga Qaxootiga iyo soo-galootiga (Σ.Ε.Μ.Π.) oo ka jira ka jira degmada.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shaqada iyo hawlgalka Golaha Dal-laqabsiga Qaxoo-tiga iyo Soo-galootiga waxa laga heli karaa halkan.

## Hay’adaha Metelaadda Wadajirka ah ee Muwaadiniinta Waddan Saddexaad

Ururada Aan Faa’iido Doonka Ahayn iyo muwadiniinta waddan saddexaad waxa loo tixgelin karaa inay yihiin hay’adaha metelaadda wadajirka ah ee muwaadiniinta waddan saddexaad Hay’adahan ayaa waxay door aad muhiim ah ku leeyihiin dhexdhexaadinta hay’adeed ee kooxaha daneeya hawlaha soo galootiga. Intaas waxa dheer, xubnaha hay’adahani waxay kaalmo weyn siin karaan dadka ay Giriigga ugu horeyso, si ay ula qabsadaan oo u dhexgalaan bulshada Giriigga.

Wasaaradda Socdaalka iyo Qoxootiga, gaar ahaanna Agaasinka Isdhexgalka Bulshada, wuxu aqoonsan yihiin muhimadda iyo doorka ay leeyihiin hay’addahan, sidaa darteed waxay abuureen diiwaan ku saabsan hay’adahan. Iyadoo lagu saleynayo diiwaankan, ururada iyo kooxahan soo socda ee metela muwadiniinta waddan saddexaad ayaa si rasmi ah uga jira oo uga hawlgala Giriigga:

Golaha Qaxoontiga Giriigga, www.refugees.gr, F: @Greekforumofrefugees

Golaha Soo-galootiga Giriigga, www.migrant.gr, F: @GreekForumOfMigrants

Ururka Hooyo Teresa ee Soo-galootiga Albaaniya,
F: Albaaniyaan.association.mother.tereza.greece

Jaaliyadda Soo-galootiga iyo Qaxootiga Afgaanistaan, F: @Afghans.inGreece

Ururka Sinigaaliyiinta Athens DIAMM AK TERANGA,
F: ASSOCIATION DES SENEGALAIS D’ATHENES-GRECE

Jaaliyadda Koongo ee Giriigga, F: @congolesecommunityofgreece

Guddiga Reer Afgaanistaan ee Giriigga

Jaaliyadda Ayfoorikoosto ee Giriigga, http://www.ivoirogrec.eu/,
F: @IvorianCommunityofGreece

Jiilka Labaad 2.0/Machadka Xuquuqda, Sinnaanta iyo Kala Duwanaanta,
https://g2red.org/, @secondgenerationgreece

Ururka Isku-tagga ururada Albaaniyiinta Giriigga, F: @federatashoqatave.shqiptaregreqi

Bulshada Dhaqanka iyo Kaalmada Pak ee Giriigga

Jaaliyadda Hindida ee Giriigga http://www.indogreek.org/GICWA/index.html,
F: @indianexpats

Jaaliyadda Nayjeeriya ee Giriigga, F: Jaaliyadda Nayjeeriya ee Giriigga

## Miiska Kaalmada Isdhexgalka Bulshada

Agaasinka Isdhexgalka Bulshada ee Wasaaradda Socdaalka iyo Qoxootiga wuxu hawlgeliyaa adeega "Miiska Kaalmada Isdhexgalka Bulshada", iyadoo ay uga dan leeyihiin maareynta su'aalaha ay qabaan dadka helay ilaalinta caa-lamiga ah iyo inay tilmaamo ka siiyaan arrimaha la xiriira nidaamka la qabsiga Giriigga, sida helitaanka koorsooyinka luuqadda Giriigga, bixinta talo shaqo, ikhtiyaaro hoy, nidaamka helitaanka Lambarka Aqoonsiga Canshuuraha (AΦM) iyo Lambarka Ammaanka Bulshada (AMKA).

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan adeegga «Miiska Kaalmada Isdhexgalka Bulshada» waxaad ka heleysaa halkan.

**Xarunta Isku-duwidda Arimaha Qaxoontiga iyo Soo-galootiga ee Athens(Xarunta Isku-duwidaa Arimaha Qaxoontiga iyo Soo-galootiga ee Athens – ACCMR)/Bog Dhijitaal ah**

Xarunta Isku-duwidda Arimaha Qaxoontiga iyo Soo-galootiga ee Athens (ACCMR) waxay u shaqey bar isku-duwis ahaaneed oo loogu talagalay horumarinta iyo iswaydaarsiga dhaqamada iyo aqoonta fiican ee ka dhexays Dowladda Hoose ee Athens iyo NGO-yada maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ah, ururada caalamiga ah iyo golayaasha hay'adaha.

Bogga Khariiradeynta Adeegyada Dhijitaalka ah ee ACCMR waa qalab khariiradeedka lagaga qayb qaato adeegyada iyo hawlaha ay dhaqangeliyaan hay'daha ACCMR, ee diiradda saaraya dadwaynaha qaxootiga iyo soo-galootiga ah.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ACCMR ayaa laga helayaa halkan.

## AdeegyadaDegdegga ah

Haddii aad la kulanto xaalad degdeg ah, waxaad la xiriiri kartaa adeegyada ku habboon adiga oo wacaya taleefanada soo socda:

**Gargaar caafimaad ee degdeg ah / Xarunta Qaranka ee Daryeelka Degdegga ah (EKAB):** 166

**Booliska:** 100

**Adeegga Dab-damiska:** 199

**Ilaalada xeebaha:** 108

**Lambarka Xaaladaha Degdegga Ah Ee Yurub:** 112

**Khadka Kaalmada SOS ee 24-ka Saacadoodba ahee wax lagaga qabto lagulana dagaalamo xadgudbka ka dhanka ah haweenka:** 15900

**Khadka Booliska ee 24-ka saacadoodba ah ee lagu soo gudbiyo dhacdooyinka cunsuriyadda iyo rabshadaha:** 11414

**Khadka Tahriibinta Dadka:** 1109

**Xarunta Xakamaynta Sumaha:** 0030 210 7793777

HELLENIC REPUBLIC
Ministry of Migration & Asylum

196-198 Thivon Avenue,
182 33 Ag. Ioannis Rentis - Nikaia
https://migration.gov.gr/

UNHCR
The UN Refugee Agency

UNHCR Representation in Greece

91 Michalakopoulou street,
115 28, Athens
Tel. 216 2007800 | Fax 210 6726417
Email: great@unhcr.org | www.unhcr.gr